

Foomka Xarunta Caafimaadka ee Qaadida Muunada COVID-19

Qaybta A: Macluumaadka Deegaanka

MAGACA (Awowga)	(Koowaad)	(Aabaha)
CINWAANKA BOOSTADA		
MAGAALADA	GOBOL	ZIP-KA
TAARIIKHDA DHALASHADA _____/_____/_____ Bisha / Maalinta / Sanadka	TALEEFAN NAMBARKA	
GOOBTA XARUNTA CAAAFIMAADKA/QAADIDA MUUNADA:		

Qaybta B: Macluumaadka ku saabsan Qaadida Muunada

Shaybaadhka hore ee SARS-CoV-2, CDC wuxuu kugula talinayaa in muunada la qaadayo ee la baadhayaa ay noqoto sanqaruurka oo lagu qaadayo cudbiga sanku.

Cudbiga muunada sanku lagu qaado waxaa aayar loo geliyaa san qaruurka ilaa 1 cmm (0.5 inji) oo waxaa la gaadhsiiyaa ilaa xabka waxaana ay ku jirtaa 10 ilaa 15 daqiiqo. Waxa aad ka dibna aayar uga soo saartaa oo aad qaadaa muunada sanku kale adiga oo isla qorigaa cudbiga leh isticmlaalaya.

Qaybta C: Macluumaadka ku saabsan Wadaagista Caafimaadka Shakhsi Ahaaneed

Waxaa kamid ah nidaamka shaybaadhka, oo aan fahansanahay oo aan aqbalay, aniga iyo/ama ilmahayga yar ee ka yar 18 jirka iyo/ama sharciga waadhka, in macluumaadkayga shakhsi ahaaneed (magacayga, taariikhda dhalashada, muunada shaybaadhka iyo natiijada) lala wadaagi doono cid kale oo ka baxsan Waaxda Caafimaadka Vermont (CIC Health, CareEvolve iyo Ellkay) taas oo kaliya tahay ujeedadeedu in laga shaqeeyo muunada, qiimaynta iyo ogolaanshaha shaybaadhka, hadii ay munaasab tahay, iyo inay nasiyaan aniga iyo Waaxda Caafimaadka natiijooyinka. Waaxda Caafimaadka iyo cidahan kale dhamaan waxa ay u hogaansan yihiin shuruucda gobolka iyo federalka ee sirta ee ilaalinta macluumaadka caafimaadka shakhsi ahaaneed, oo ay ku jiraan HIPAA, iyo isticmaalka dadaalka ugu haboon ee isticmaalka ganacsi in aan la bixin macluumaadka caafimaadka ee haybta qofka sheegaya, marka laga tago xaaladaha soo socda: hadii ay dhacdo xaalad degdeg ah; wixii ujeedada daba galka isku dhawaanshaha ah; si loogu sheego dadka kale khatartooda iyo wixii kale ee sharcigu ogol yahay ama waajibinayo.

Waxa aan qirayaa in aan heley macluumaadka ku saabsan wargelinta sirka Gobolka Vermont [\[Link\]](#) iyo shuruucda xeerka sirta ee cida kale [\[Link\]](#). Waxa aan sidoo kale fahansanahay oo aan ogolaaday in macluumaadkayga caafimaadka shakhsi ahaaneed la isticmaali karo, isaga oo ayna la socon macluumaadka sheegaya haybta, daraasada darteed si kor loogu qaado is fahanka SARS-CoV2 iyo/ama COVID19, in la sameeyo shaybaadh, daawayn, iyo in la sameeyo wacyi gelin saynis ama farsamo, iyada oo bilaa xadidaad ah.

Hadii aad qabto su'aalo, fadlan la xidhiidh: margaret.robinson@vermont.gov ama waydii qofka ku siiyay foomkan.

Qaybta D: Ogolaanshe

Marka aan saxeexo hoos, waxa aan ogolaaday waxyaabaha soo socda:

- Waxa aan akhriyay macluumaadka sida muunada COVID-19 loo qadayo iyo inta uu le'eg yahay macluumaadkayga caafimaadka ee la wadaagayo ee la ilaalinayaa.
- Waxa aan fursad u heley in aan waydiiso su'aalo.
- Waxa aan siiyay ogolaanshahayga Waaxda Caafimaadka Vermont iyo ururka kale (CIC Health) inay qaadaan muunada oo ay qaadaa wixii talaabooyin daruuri ah ee shaybaadhka ka danbeeya muunada COVID-19 ee ay qaadeen.
- Waxa aan fahansanahay oo aan ogolaaday in wadaagista qaar macluumaadkayga caafimaadka ee shakhsi ahaaneed ee cid kale lasiinayo (CIC Health, ixLayer) taas oo ujeedadeedu tahay shaybaadhka caafimaadka iyo ilaalinta caafimaadka shacabka (ay kamid yihiin taxanaha genomic ee fayraska iyada oo la isticmaalayo muunadaha).
- Waxa aan fursad u heley in aan akhriyo wargelinta sirta ee Waaxda Caafimaadka iyo xeerarka sirta ee cida kale oo aan ogolaado shuruudahooda.

Magaca: _____

Saxeexa: _____

Taariikhda: ___/___/___

Hadii shakhsiga la baadhayaa uu ka yar yahay 18 jir:

Magaca Waalidka/Masuulka Sharciga ah:

*Hadii ilmaha yar uu hayo gobolku, wakiil awood u leh ayaa loo baahan yahay inuu saxeexo.

Saxeexa Waalidka/Masuulka Sharciga:

*Hadii ilmaha yar uu hayo gobolku, wakiil awood u leh ayaa loo baahan yahay inuu saxeexo.

Taariikhda: ___/___/___

Magaca, Jagada iyo Saxeexa Xirfadalaha Daryeelka Caafimaadka ee Muunada Qaadaa:

Nooca Muunada La Qaaday: NP Sanka

Magaca (Daabacan)

Jagada/Aqoonsiga

Saxeexa

Taariikhda: ___/___/___